

NAGALA SOO XIRIIR!

Xafiiska Degmada206.631.3000
Xarunta Qoyska.....206.631.3003
Gadiidka.....206.631.7502
Adeega Caafimaadka.....206.631.3011
Diiwaan gelinta ardayga.....206.631.3065
Xafiiska ELL.....206.631.3035
Waxbarashada Ga'aarka ah...206.631.3009
(koritaanka Ilmaha)
Qado lacag la'aan ah
ama qiimo dhiman.....206.631.3010

Xafiiska dhexe iyo Xarunta qoyska
15675 Ambaum Blvd. SW
Burien, WA 98166

DIIRADDA SAAR MUSTAQBALKA



Ilmaahaaga u diyaari mustaqbalka iyo yoolka uu jecelyahay

Waa wax caadi ah in ardada ay ku hamiyaan inay noqdaan, Macalin, Dhakhtar iyo wxii la mid ah. Ilmaha ayaga oo yar-yar ay ka fakiraan waxa ay naqan doonaan marka ay weynaadaan.

Ilmahaaga goorta ay bilaabaan in ay ka hadlaan waxay noqon rabaan, u sheeg waxay u baahanyihiin si ay u gaaraan himiladooda.

Tusaale: Ilmahaaga haduu yiraahdo, "waxaan noqon rabaa Macalin," waxaad ugu jawaabta, "waa fikir fican! Macalimiinta waxay kaalmeeyaan dadka. Waxa lagaa rabaa inaad Jaamacad aado, si aad u naqato Macalin. Jaamacadda waa dugsiiga Macalinimada lagu barto.

SOO DAAHID LA'AAN MAALIN KASTA.

Ardada wakhtiga ilaalisa oo aan soo daahin sanad Dugiyeedka:

- Darajo fican ayay ku gudbaan.
- Dugsiga Sare badankooda waa dhameystaan.
- Dabeecado wanaagsan ay yeeshaan oo surta gal ka dhiga in ay waxbarashada iyo mustaqbalka guuleystaan.

Ardada waxay ky qaadata sadex maalmood inay kasoo kabtaan hal maalin oo ay maqnaadaan.

HALKAN NAGALA SOO XIRIIR

Macalinka Magaciisa

Sacadaha Xafiiska

Emailka Macalinka

Taleefanka Xafiiska Guud #

Telefoonka #

Joogid/Xaadir #



highlineschools.org

SOO DHAWAADA


KU: FASALKA BILOWGA EE 5 JIRKA/KG

XOGTA IYO MACLUUMAADKA
AAD U BAAHANTAHAY



Every student is known by name, strength and need.





*WaKIDS Whole child Assessment- maa ahan imtixaan ardada u fadhiisanayso, balse waa qiimayn ardayga loo samaynayo sanadka horaantiisa oo lagu ogaanayo arday kasta wuxuu yaqaano sanadka bilowgiisa. Taas oo loogu talagalay in Macaliminta iyo waalidka si wada jir ah ilmaha uga kaalmeyaan horumarkiisa iyo wax barashadiisa.



ILMAAHAAGA MARKA DUGISGA KA IMAADAAN SUAALAHAN WARSO:

Maanta wax xiisa leh ma la kulantay?

Maanta maxaad jecleysan ama xiisayn?

Maanta yaa isla cunteen qadadii, yaa wada ciyaarteen ama wada shaqeyseen?

Maxaad dareenta _____?

Ardada Inay Ku Guuleystaan Maadooyinka

Si Ardada u guuleystaan Dugsiga Sare ka dib, dawladda waxa ay qeexday sida la rabo in maadooyinka sida Englishka iyo Xisaabta loo barto ilaa Fasalka 12aad. Dawladda waxay ahamiyad siisay kobciska fikirka, xalinta mashaakilka iyo xirfadaha ardada u horseedi kara horumar.

SAYNISKA

- Baro xoogagga dabeecada iyo is dhexgalokooda: riixid iyo jiidis.
- Baro noolaha iyo cimilada ku wareegsan.
- Baro cimilada iyo hawada.

MUUSIKADA

- Ku dadaal codka meel dhaxaadka ah.
- Isbaal dhig codadka kal duwan - deg-deg/ tartiib, kor/hooos, iskumid/kala gedisan.
- Isku day inaad ogaato halka aad soconayso

BARASHADA DAREENKA BULSHADA

- In laga wada hadlo oo la magacaabo dareenka bulshada.
- Ka qayb qaado shirarka fasalka iyo dugsiga.
- In la fahmo oo la ilaaliyo dareenka dadka.

XISAABTA

- Tiri oo isbaal dhig laba walaxood oo kala duwan.
- Laba tiro is baal dhig oo sheeg ka badan.
- In ilmaha barto oo fahmo isu geyn iyo kala jar.
- Isu gee oo kala jar laba tiro oo fudud.
- Siyaabo kala duwan oo laysugu geyn karo 10 iyo wixi ka yar.
- Ka shaqee isu geyn iyo kala jar kelmado ah 10 iyo wixi ka yar- adeegso musawiro ama walaxa kale.

AKHRISKA IYO QORAALKA

- Ilmaha ha barto sida loo qoro xuruuftaa(aA) yaryar iyo waaweyn.
- Ilmaha ha barto xarafka sida uu u qormo iyo sida loogu dhawaaqo.
- Ku dhawaaq kelmadaha - qoraal/iyo akhris.
- Ilmaha ha barto kelmado cusub oo ha adeegso.
- Tus ilmaha kelmadaha isku dhawaaq ah.
- Ilmaha u akhri kelmadaha sida: of, you, are, my, the.
- Ilmaha ka warso sheeko ama buug macalinku u akhriyey.
- Ka qayb qado in ilmaha lala sheekeysto oo qof kasta la siiyo fursad uu ku hadlo.
- Adeegso musawiro iyo wixi la mid ah iyada oo hal mawduuc laga sheekeynaayo ama la qorayo.

JIMICSIGA IYO CAAFIMAADKA

- In ilmaha ka qayb qaato jimicsi kla duwan.
- In ilmaha la yimaado akhlaaq iyo in muujiyo ixtiraam.

CULUUNTA BULSHADA

- Baro xaqqa iyo sharciga: Maxaa loogu baahanyahay sharciga? Waa maxay macnehedu in sharciga loo hoogaansamo?
- Baro sida loo xaliyo mashaakilka bulshada oo saaxiib fican noqo.

XOG DHEERAAD AH IYO MACLUUMAAD WAXBARASHO:
highlineschools.org/guide

Ilmaahaga waxbarashada guriga ka kaalme

Ilmaha maalintii 20 daqiiqo wax la akhri.



Hubso in ilmaha 10 saacadoo oo hurdo ah helo habeenkii.

Macalinka ayaad ka helaysa farsamada iyo xirfadaha aad u baahantahay si ilmahaaga guriga ugu kaalmeyn lahayd.

Af Somaaliga kula hadal oo ku shaqeeya adiga iyo ilmaha Websaydka dugsiga adeegsada adiga iyo ilmaha.



BARO OO LA XIRIIR DUGSIGA IYO MACALIMIINA

Warso Maamulaha iyo xarunta qoyska sidii aad ula xiriiri lahayd Dugsiga.



SI JOOGTO AH ULA HADAL

Hadii aad suaal qabto si taos ah ula xiriir Macalinka.